## Doorka waalidiinta gudaha dugsiga

*Waalidiin ahaan, haddii aad rumaysan tahay in dugsigu uu muhiim yahay, waxaa jirta fursad kasta in ilmahaaguna sidaas oo kale uu yahay sidoo kale. Mowqifka wanaagsan ee dugsiga ee qaybta waalidiinta si dhow waxay ugu xidhan tahay dhiirigelinta ardayga iyo waxbarashadda, labbadaba bulsho ahaan iyo waxbarasho ahaan.*

Halkan waxaa jira hage gaaban oo ah sida waalidiintu u caawin karaan si loo hubiyo nabada iyo saadaalinta goobta dugsiga ee ilmahaaga.

### 1. Asbaabahee ku dhiirigeliyada carururta dhanka dugsiga?

Qaabka waalidiintu ay uga hadlaan dugsiga, macalimiinta, maadooyinka tacliinta iyo qiimaha waxbarashhada waxa uu ku leeyahay saamayn wayn mowqifka carruurta ee dugsiga. Waalidiinta iyo dugsiga mid kastaa waxay ku leeyihiin doorar kala duwan bulsho dhexgalka carruurta iyo waxbarashadda aan rasmiga ahayn. Dhexda wada shaqaynta wanaagsan ee guriga-dugsiga, dugsiga iyo waalidiintu waxay caawin karaan ardaydu inay ku wanagaasanaadaan oo si fiican ay wax ugu bartaa dugsiga.

### 2. Maxaan u jeednaa wada shaqaynta guriga-dugsiga?

Dugsigu waxa uu leeyahay waajibka lagu fududaynayo wada shaqaynta waxtarka leh ee guriga-dugsiga ee qof kasta oo ka qayb qaadanaya. Waalidiinta waxaa laga filayaa inay la socdaan qaban qaabo kasta oo uu u sameeyo dugsiga ilmahooda. Ka qayb qaadashada waalidku keliya sax maaha, laakiin sidoo kale waa waajib. Xidhiidhka waxtarka leh ee guriga-dugsiga waxay dhiirigeliyaan fayo qabka ardayga iyo ka guul gaadhida waxbarashadda. Waa u muhiim waalidku inay taageeraan koboca ilmahooda iyo waxbarashadda xaga dugsiga.

### 3. Sidee waalidku ugu dhiirigelin karaan ilmahaadu inuu ku wanaagsanaado dugsiga?

- Ka hadal wax ku saabsan dugsiga xaga guriga iyo waxa ay tahay waayo aragnimooyink aiolmahaaga.
- Ku dhiirigeli ilmahaaga inuu kuu sheego wax ku saabsan maadooyinka kala duwan ee tacliinta iyo macalimiinta xaga dugsiga
- Ku biir bulshadda dugsiga addoo soo xaadiraya dhacdooyinka dugsiga
- Ka qayb qaado laylisyada guriga ee ilmahaaga
- Ku dhiirigeli ilmahaaga inuu u soo kaxaysto guriga saaxiibada dugsiga
- Wada shaqaynta wax soo saarka leh ee korinta guriga dugsiga la hadlida macalimiinta iyo hogaanka dugsiga
- La xidhiidh dugsiga haddii aad qabto walaacyo

### 4. Qiimahee ayay kuu leedahay bulshadda dugsiga waalidiin ahaan?

Dugsigu maaha garoonka waxbarashadda ilmahaaga. Dugsigu sidoo kale waxa uu siiyaa waalidiinta fursada lagu xidhmayo waalidiinta kale ee carruurta xaga dugsiga iyo gudaha bulshadda deegaanka. Sidoo kale waxan garanaynaa xidhiidhka wanaagsan ee u dhexeeya waalidiinta ardayda gudaha fasalka caawimadeeda si loo sameeyo deegaanka waxbarashadda wanaagsan ee ardayda. Qaabkan, dugsigu waxa uu u adeegi karaa sidii goobta kullanka ee qoyska oo dhan.

### 5. Sababtee kullamada waalidku muhiim u yihiin?

Kullamada waalidka ("foreldremøter") waa qayb ka mid ah Xeerka Waxbarashadda Noorwayjiyaanka (Qaybta 20-3) iyo guud ahaan isku imaanshaha halka dugsigu uu u sheego waalidiinta wax ku saabsan waxbarasha ardaydu ay helaan, ka qayb qaadashada waalidka iyo nidaamyada dugsiga. Laakiin kullamada waalidka sidoo kale waa garoonka is dhexgalka iyo falan qaynta u dhaxaysa waalidiinta. Garoonkan, waalidku waxay samayn karaan shabakado oo wada jir ayay u shaqayn karaan si ay u soo bandhigaan aragtida waalidka ee la xidhiidha dugsiga. Kullamada waalidku waxaa lagu qaban karaa

fasalada gaarka ah, kooxaha sanadka oo dhan ama dugsiga oo dhan. Intaa waxa dheer, xaga dugsi kasta, waxaa jira dadka la xidhiidhayo fasalka ("klassekontakter") iyo FAU ("Foreldrerådets Arbeidsutvalg"), taas oo ah kooxda shaqaynaysa ee gollaha waalidka kaas oo waalidiin ahaan lagaa dooran karo.

6. **Waa maxay FAU?**

FAU ("Foreldrerådets Arbeidsutvalg") waa ururka wakiilada waalidiinta carruurta ka diiwaan gashan dugsiga. Doorka ugu wayn ee FAU waa inay fududayso wada shaqaynta labba qaab ee u dhaxaysa dugsiga iyo waalidiinta koox ahaan. FAU waa urur rasmi ah, oo uu sharcigu u baahan yahay inuu awood siiyo waalidiinta inay fikradooda ka dhiibtaan maamulida dugsiga oo waa madal kaas oo waalidiinta aragtidooda ku saabsan beddelaadaha iyo horumarka xaga dugsiga waajib ay tahay in la maqlo oo xisaabta lagu darsado. Dhammaan waalidiinta ardayda xaga dugsiga si aan toos ahayn ayay uga diiwaan gashan yihiin gollaha waalidiinta ("Foreldrerådet"). Goolaha waalidiintu waxay doortaan kooxda shaqaynaysa (FAU) sidii guddida metelaysa dhammaan waalidiinta ardayda xaga dugsiga. Haddii aad jeclaan lahayd in laguu doorto inaa ka shaqayso FAU kooxdeeda shaqaynaysa, waxaad si mutadawic ah ugu shaqayn kartaa marka xubnaha lagu doorto xaga kullanka sanadlaha ah ee guud ee waalidiinta. Kullankan caadi ahaan waxaa la qabtaa gu'ga.

7. **Waa maxay xidhiidhada fasalku?**

Xidhiidhka fasalka ("klassekontakt") waa waalidka loo doortay inuu metelo dhammaan waalidka ardayda gudaha fasalka, kaas oo doorkiisa u muhiimsan ay tahay inuu isku xidho macalinka xidhiidhka ("kontaktlærer") iyo waalidka. Xidhiidhka fasalku maaha shuruud sharci ah, oo waxaa loo abaabulaa qaab kala duwan hal dugsi ilaa midi kale. Qaar ka mid ah dugsiyada waxay doortaan labba xidhiidhada fasalka, kuwaas oo u shaqeeya sidii wakiilada FAU. Fasalada qaarkood waxay doortaan hal xidhiidhiye fasal iyo hal wakiil FAU. Iyaddoon loo eegin habbaynta, waalidkan loo doortay xidhiidhiyayaasha fasalka ama wakiilada FAU waxaa laga filayaa inay si waxtar leh ula shaqeeyaan samaynta deegaan wanaagsan oo waxbarasho oo ah fasalka oo dhan iyo xidhiidhka wanaagsan ee u dhexeeya waalidka. U shaqaynta sidii xidhiidhka fasalka ama wakiilka FAU waxa uu kaa qayb gelin doonaa waalid ahaan masuuliyado macno buuxa leh oo laga qayb qaadanayo, iyo waa aasaaska wada shaqaynta waxtarka leh ee guriga -dugsiga.

8. **Qarsoodiga**

Dhammaan shaqaalaha dugsiyada, ka hor iyo ka dib naadiyada ("SFO"). kalkaalisooyinka dugsiga iyo dhakhtarada iyo Adeega Daryeelka Ilmaha waa ku waajib qarsoodiga ama xil qarintu. Waajibkan qarsoodiga sidoo kale waxa uu ku baahayaa waaldiiinta u adeegaya sidii xidhiidhada fasalka iyo wakiilada FAU. Qarsoodiga macnaheedu waxa weeye inaanay u shaacin wax macluumaad ah oo ay ka helaan adiga/ilmahaaga qofnaba iyaddoon la haysan *oggolaansho.* Oggolaanshaha macnahiisu waxa weeye inaad aqbasho qof u gudbinaya macluumaad ku saabsan adiga ama ilmahaaga qof ama koox aad oggolaato.

Qarsoodiga ama xil qarinta waxa u baahan sharciga, oo ku xad gudubka waajibka qarsoodigu waxa uu keeni karaa ganaax ama xabsi.

9. **Waajibka Shaacinta -- ka xorta ah waajibka qarsoodiga**

Xeerka Waxbarashadda Noorwayjiyaanka (Qaybta 15-3) iyo Xeerka Dugsiga Barbaarinta Noorwayjiyaanka (Qaybta 22), waxay sheegayaan in shaqaalaha u shaqaynaya hay'ada waxbarasheed uu leeyahay waajibka shaacinta.

Tan macnaheedu waxa weeye in haddii ay hayaan sabab ay ku rumaystaan in ilmahu uu khatar ku jiro xaga guriga, markaas waa inay ku wargeliyaan Adeega Daryeelka Ilmaha. Dugsigu waa inuu kugu wargeliyaa adiga waalid ahaan haddii warbixintan la sameeyay.

Xaaladaha halista ee ku xad gudubka ilmaha, shaqaalahu waxay ku wargelinayaan Adeega Daryeelka Ilmaha iyagoon ku xad gudbayn waajibkooda xil qarinta iyo iyagoon ku wargelin waalidiinta.